

# OhioHealth

## Warka Caafimaad ee kuu Gaarka ah oo la asturo (Protected Health Information) (PHI)

### Ogeysiiskan wuxu sharxayaa sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaali karo iyo sida aad u heli karto macluumaadkaas. Fadlan u eeg si taxadir leh.

OhioHealth waa nidaam caafimaad oo ay ka mid yihiin cisbitaalo, kiliiniyoo, xarumaha caafimaadka bulshada, guriga daryeelka caafimaadka, iyo xirfadlayaha kale oo daryeelka caafimaadka ah. Ogeysiiskan Dhaqanada Asturnaanta wuxuu saameeyaa xaruntan OhioHealth iyo Shaqaalaha Caafimaadka ee xarumaha iyada oo ah qabanqaabo daryeel caafimaad oo nidaamsan.

Dadka bixiya daryeelkayaga caafimaad waxay u shaqeeyaan si wada jir ah si ay u siiyaan daryeelka ugu fiican bukaankooda. Sida uu oggol yahay qaanuunku iyo hadii loo baahdo oo kaliya, xogta caafimaad waa la wadaagaa si loo bixiyo daaweynta ugu fiican, loo diyaariyo kharash bixinta, iyo si aan u horumarino sida aan u bixino daryeelka mustaqbalka. Ogeysiiskan ujeedadiisu waa in lagu sheego sida aan u wadaagno macluumaadkaaga iyo si aad u ogaatid sida aan u dabaqno wadaagida macluumaadka. Waxa laga yaabaa inaad heshid ogeysiiskan intaan soo booqan isbitaalka, ama in lagu siiyo markaad timaado meesha booqashada. Markaad oggolaato in lagu daweyyo booqashadan, waxaa lagu waydiin doonaa inaad aqoonsato (garato) xaashida ogeysiiska ee asturnaanta qofka.

#### I. Waxa na saaran waajib qaanuuniya si aan u illaalino macluumaadkaaga caafimaad

Sida qanuunku sheegayo, waa inaan u illaalinaa xogtaada caafimaad si gaar ah kuuna sheegnaa inaan sidaa samaynayno. Tan waxaa ku jira caafimaad hore, kan imika iyo ka mustaqbalka (xaaladaada, daryeelka lagu siiyey, ama kharash bixintaada). Waa inaan raacno shuruudaha ogeysiiskan. Haddii ay isbedelaan, waan bedeli doonaa ogeysiiska si aad u oggaato isbedelada. Waxaad ka heli kartaa nuqulka ogeysiis kasta oo dib u habeeyey Sarkaalka Asturnaanta OhioHealth, ee Corporate Ethics and Compliance, macluumaadka la-xidhiidhista waxay ku taxan tahay Qaybta V ee ogeysiiska.

#### II. Waxaa Laga Yaabaa Inaan u Icticmaalo ama u Kashifno (wadaagno) Macluumaadkaaga Caafimaad sababaha soo socda

##### 1. Daaweyn Darteed / Daryeel. Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo una wadaagno xogtaada caafimaad daaweyntaada ama daryeelkaaga.

Tusaale ahaan:

- Dhakhaatiirta kalkaaliyayaasha, wadaadka isbitaalka iyo shaqaalaha kale ee ka shaqeeya daryeelkaagu waxay isticmaali doonaan xogta ku qoran jadwalkaaga (diiwaankaaga caafimaadka) sidaa darteed waxaanu ku siin doonaa daryeelka ugu fiican.
- Hadii lagaa daweyyay dhaawac kaaga dhacay jilibka, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad shaqaalaha daaweynta jirka sidaa darteed waxay ka caawin doontaa inay kuu qorsheeyaan sida aad u dhaqdhaqaaqayso.
- Waxa kaale oo laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad xarun kale oo daryeel caafimaad ama xirfadlayaal anaga oo aan anaga nala xiriirin laakiin ku siin doona daaweyn ama daryeel. Tusaale ahaan, hadii aad ka tagto xaruntan caafimaad si aad u hesho daryeel caafimaad guri, waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad wakaalada bixisa daryeelka caafimaad ee guriga sidaa darteed daaweyntaada iyo daryeelkaaga ayaa lagu diyaarin doonaa.
- Warbaahin Sawiro iyo Maqal iyo muuqaal (AV) ayaa laga yaabaa in la isticmaalo inta lagu jiro waqtiga daryeelka caafimaadkaaga ee hawlgalka cisbitaalka ama ujeedooyin lacag bixina, ilaa sawirada qaarkood ee warbaahinta maqal iyo muuqaalka dib loo xaqiijinayo, waxaa loo tixgalin doonaa macluumaad caafimaad ee dhawrsan.

##### 2. Bixinta Kharashka Daaweyntaada. Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo xogta caafimaad hadii loo baahdo ujeedooyin la xiriira kharash bixinta.

Tusaale ahaan:

- Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno xog ku saabsan baaritaankaaga iyo daryeelkaagaa shikadaada caymiska si aan u habayno kharashka adeegyadii lagu siiyey.
- Waxa laga yaabaa inaan isticmaalo xogtaada si aan u diyaarino rasiid (biil) si aanu kuugu soo dirno ama ugu dirno qofka ka ma'suulka ah kharash bixintaada.
- Waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad xafiisyo ay shaqo naga dhaxayso kuwaasoo naga caawiya waxyaalaha ay ka mid ka yihiin qorida biilasha (rasiidka) iyo dalabada. Xafiisyadan waxa waajib ku ah inay ilaaliyaan asturnaanta xogtaada.
- Kharash bixinta darteed, waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada caafimaad xirfadlayaal kale oo daryeel caafimaad kuwaasoo ku daaweeyey ama ku siiyey adeegyo, waxa laga yaabaana inaanay ahayn xafiisyada anaga nala xiriira.

3. **Fulinta Daryeelka Caafimaadka Dartii.** Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalo una wadaagno xogtaada caafimaad, sida daruuriga ah isla markaana uu oggol yahay qaanuunku, si loo horumariyo daryeelka iyo shaqada cisbitaalka (sida in la horumariyo daryeelka bukaan eegida, qiimaynta shaqaalaha, maaraynta shaqadayada, hanti dhowrka, adeegyada qaanuunka, shahaado qaadashada, iyo qaadshada warqada shaqada).

Tusaale ahaan:

- Waxa aan adeegsan karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si loo qiimeeyo daryeelka ay shaqaaluhu bixiyaan.
  - Waxa laga yaabaa inaan u baahano inaan la wadaagno xogta caafimaadka xafiisyo ay shaqo naga dhaxayso, kuwaa soo naga caawiya shaqooyinkayaga daryeelka caafimaadka. Xafiisyadan waxa waajib ku ah inay ilaaliyaan arimaha gaarka ah ee xogtaada.
  - Waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada caafimaad xirfadlayaal kale oo daryeel caafimaad, xarumo iyo qorshaynta caafimaadka si ay uga caawiso inay horumariyaan daryeelkooda iyo shaqadooda, laakiin oo keliya hadii ay kula leeyihiin xiriirka bukaanka.
4. **Qaaraan Dartii.** Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo xogta caafimaadka si aan ugu ururino lacag isbitaalada iyo xarumaha. Lacagta la soo ururiyey waxaa loo isticmaalaa si loo horumariyo loona taageero daryeelka caafimaadka iyo barnaamijyada waxbarashada aanu siino bulshada. Waxa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aad ugu tabarucdo lacag uruurinta. Xaq baad u leedahay in aadan ka qaybqaadan lacag ururinta sidaa darteed ma heli doontid macluumaadka lacag ururinta. Waad ka bixi kartaa haddii aad u soo dirto magacaaga iyo cinwaankaaga Ururka xaruntan, adiga oo soo raacinaya inaad rabin inaad hesho macluumaadka maalgelinta ama isgaadhsiinta.
5. **Xusuusinta ballanta iyo faa'iidooyinka la xiriira caafimaadka ama adeegyada.** Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo xogtaada caafimaadka si aan kuugu soo dirno ballan xasuusin ama jawaabta baaritaanka.
6. **Badeecadaha (Daawooyinka) iyo Adeegyada Caafimaadka.** Waxa laga yaabaa inaan u isticmaalo macluumaadkaaga caafimaadka si aanu kula socodsiiyo badeecadahayaga iyo adeegyada caafimaadka, kuwaa soo daruuri u ah daryeelkaaga, si aanu kuugu sheegno badeecadaha cusub iyo adgeeyada aanu bixino iyo si aanu kuu siino macluumaadka caafimaadka guud iyo xaaladaha caafimaad ee wanaagsan.
7. **Xaq-siinta shaqaalaha.** Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad wakiilada xaq-siinta shaqaalaha hadii loo baahdo si loo go'aamiyo faa'iidada (xaq-siinta).
8. **Hadii cida aad u shaqaysaa ay dalbato adeegyo.** Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad cidii ku shaqaalaysay marka aanu ku siino daryeel hadii uu codsado loo-shaqeeyahaagu. Waxaad heli doontaa ogeysiis sheegaya in macluumaadka loo diray cida aad u shaqayso.
9. **Qaybo dawlada ka mid ah.** Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad hadii loo baahdo:
- Hadii aad ka fariisatay ciidamada ama aad ku jirtid ciidamada.
  - Badbaadada qaranka ama dhaqdhaqaaqyada nabadgalyada dartood, sida illaalinta Madaxwaynaha Maraykanka ama ururinta arimo sirtoon.
10. **Si looga hortago waxyeelo.** Waxa laga yaabaa inaan la wadaagno xogta caafimaadka ciidamada fuliya qaanuunka ama shaqaalaha amniga si looga hortago halis khatar ku ah caafimaadka iyo amniga qof kaliya ama dadwaynaha.
11. **Cilmi-baaris darteed.** Waxa laga yaabaa inaan cid la wadaagno xogtaada caafimaad cilmi-baaris darteed markay u oggolaadaan gudida dib-u-eegida hay'adeed iyada oo la eegayo qawaaniin gaar ah si loo illaaliyo arimaha qofka u

gaarka ah.

12. **Deeqid xubin jirkaaga ka mid ah darteed.** Waxa laga yaabaa inaan cid la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad hadii loo baahdo si loo diyaariyo deeqida xubinta ama nud jirkaaga ka mid ah ama adiga lagugu talaalo.
13. **Wakaaladaha ku shaqada leh Gafafka caafimaadka.** Qaanuun ahaan, waxa waajib ah inaan la wadaagno xogtaada caafimaad sida ay ugu baahan tahay waaxda dowlada ee samaynaysa hanti dhowrka, dembi baarista, iyo qaadida tallaabo sharciyeed oo ah madani ama ciqaabeed. Tusaale ahaan:
  - Waxaanu la wadaagi doonaa macluumaadkaaga dowlada si aanu uga caawino marka ay samaynaysa danbi baaris ku saabsan bixiye daryeel caafimaad ama urur.
14. **Hawlaha Caafimaadka dadwaynaha dartii.** Waxaa laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada caafimaad hawlo caafimaadka dadwaynaha la xiriira dartood, sida ka war bixinta cudurada, dhaawacyada, dhalashada, dhimashada, la socodka cudurada faafa. Bukaanka geeriyooda, qaanuun ahaan iyo hadii loo baahdo oo keliya, waxa waajib ah inaan la wadaagno xogtaada caafimaad saraakiisha baarta sababta keentay dhimashada iyo maamulayaasha meelaha wax lagu aaso.
15. **Arimo qaanuunka ama sharci fulinta la xiriira dartood (ha ahaato heer federaal, gobol iyo degmo).** Waxa laga yaabaa inaan cid la wadaagno macluumaadkaaga caafimaad sida kolba loogu baahdo:
  - In laga warbixiyo dhaawac, waxyeelo ama dambiyo
  - Haddii aanu ka shakino caruur lagu xad gudbay ama la dayacay
  - Haddii aanu aaminno inaad tahay dhibane lagu xad gudbay, la dayacay, ama ay dhibaato ka soo gaartay rabshad.
  - In la siiyo war bixin maamulka hay' da qaabilsan daawada iyo cuntada oo loo sheego daawooyinka keena xaalad dhibaato, badeecooyinka cilada leh, ama badeecooyinka la cellinayo.
  - Amar maxkamadeed

Sharciga Ohio wuxuu doonayaa inaan helno oggolaanshahaaga xaalado badan ka hor bandhigidda xog ku saabsan:

- Waxqabadka ama natiijooyinka nasasho ee HIV ama baaritaanno AIDS ama xaalad la xiriirta-AIDS.
- Daaweynta maandooriye ama khamri oo aad ku heshay barnaamijka maandooriye iyo khamri.
- Adeegyada caafimaad maskaxeed ee laga yaabo inaad heshay.

### III. Fursad baad u Leedahay Inaad Diido Isticmaalida iyo Kashifaadaha soo socda:

1. **Fududahayaga buug laga baadho Telefoonada (ka fiirsashada bukoonsocodka iyo bukaanka oo kaliya).** Waxaanu leenahay fududeeyaha buugga laga baadho telefoonada oo ay ku qoran yihiin magaca, cisbitaalka, lambarka qolka, lambarka telefoonka qolka, xaalada guud, iyo diinta bukaankii kasta, haddii la sheegay. Macluumaadkan waxaa kaliya oo lala wadaagi karaa wadaad masiixiya (oo aan u shaqayn hay'adan) ama dadka (booqdayaasha ama kusoo waca) ee sheega magacaaga. Waxaad xaq u leedahay in macluumaadkaaga laga saaro buuggan telefoonada laga baadho. Macluumaadkan waxa keliya oo lala wadaagi karaa dadka (martida / kuwa soo waca) ee kugu warsada magacaaga ama wadaadkaaga (oo aan ka shaqayn xaruntan) ee ku warsada bukaanka diintooda. Xaq baad u leedahay in macluumaadkaaga laga saaro diiwaankan.
2. **Qoyska iyo Saaxiibada Caawinaya Daryeelkaaga.** Oggolaanshahaaga ka dib, waxa laga yaabaa inaan la wadaagno xogtaada qoyskaaga, saaxiibadaa, ama daryeel bixiyayaal kaa caawinaya daryeelkaaga ama kharashka daryeelkaaga. Waxa laga yaabaa in aan la wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga hay'ad caawisa oo ka gargaarta masiibooyinka sidaa darteed waxa laga yaabaa inay soo helaan qoyskaaga ama cid daryeel bixisa.
3. **Isticmaalada am Kashifaadaha kale oo Dhami Waxay u Baahan Yihiin Oggolaanshahaaga.** Xaalad kasta oo aan lagu sheegin qaybta II iyo III, waxaanu ku waydiin doonaa oggolaansho qoran inta aanaan isticmaalin ama aanaan la wadaagin cid kale xogtaada caafimaad. Haddii aad saxeexo foomka oggolaanshaha, kadib waad ka noqon kartaa

oggolaanshahaa (qoraal ahaan) si aad u joojisid isticmaalo mustaqbalka ah.

#### IV. Xaq aad u Leedahay Macluumaadkaaga Caafimaadka

- 1. Xaq aad ku heli kartid Macluumaadkaaga Caafimaadkaaga.** Waxaad kale oo aad xaq u leedahay in aad hesho nuqul/koobi ah qaybaha macluumaadkaaga caafimaad ee ku jira habka elektrooniga. Xaq baad u leedahay inaad koobiyaysato (minguuriso) iyo inaad eegto inta badan macluumaadkaaga caafimaad ee aanu adiga kuu hayno.
  - Dhamaan codsiyada ku saabsan nuqulaynta/koobiynta macluumaadkaaga caafimaadkaaga waa inay ku sugnaadaan qoraal, kuna yaalaa saxiixaaga ama saxiixa wakiilkaaga qaanuun. Waxaad ka heli kartaa foom codsi hay'adan waaxdeeda diiwaanada caafimaadka.
  - Hadii uu jiro kharash, waanu kuu sheegi doonaa. Waxa laga yaabaa inaad lacag bixiso si aad u koobiyaysato macluumaadka caafimaadka, tikidhka boostada (hadii la diro) iyo / ama qoraal kooban ama sharaxaad ku saabsan macluumaadka caafimaadka.
- 2. Xaq aad u Leedahay Inaad Badasho Macluumaadkaaga Caafimaad.** Hadii aad u malaynayso inuu ku jiro khalad macluumaadkaaga caafimaad ama in lagu daro macluumaad, waxaan codsan kartaa inaan badalno macluumaadkaaga caafimaad.
  - Waa inaad haysataa codsi qoran cadaaysana sababta loo badalayo macluumaadkaaga caafimaad. Kala xidhiidh waaxda Xogta Caafimaadka foomka isbedelka.
  - Hadii aan oggolaano codsiyada, waxaanu ku dari doonaa foomka isbadalka diiwaankaaga caafimaadka, waana kuu sheegi doonaa inaan samaynay sidaa, waanan u sheegi doonaa dadka kale ee u baahan inay ogaadaan isbadalka.
  - Waxa laga yaabaa inaan diidno codsiyada hadii macluumaadkaaga caafimaad ee iminka ay sax yihiin oo dhan yihiin, ama aanaan anagu abuurin. Hadii la diido codsiyada, waxaanu kuugu sheegi doonaa qoraal, sababaha laguugu diiday. Waxaanu kuu sharxi doonaa xaq aad u leedahay inaad qorto warqad aad ku cadaynayso inaad khilaafsan tahay diidmadaa.
- 3. Xaq aad u Leedahay Liiska Qaar ka mid ah Bandhigida Macluumaadka Daryeelkaaga Caafimaad.** Xaq baad u leedahay inaad hesho liis ah marka aanu cid la wadaagnay macluumaadkaaga iyo cidii aanu la wadaagnay.

Liiskan waxaa ku jira:

- Taariikhda iyo cida (cinwaanka hadii la garanayo) macluumaadka caafimaadka loo sheegay
- Sababta iyo nooca macluumaadka caafimaadka ee la wadaagay.

Liiskan kuma jiro bandhigyadan (sheegid):

- Lagu sameeyay daaweyn, kharash lagu bixiyey, lagu fuliyey daryeel caafimaad, ama adiga si toos ah lagu siiyey, ama qoyskaaga, ama lagu daray diiwaanka xaruntayada.
- Aad hore qoraal ahaan ugu oggolaatay
- Amniga qaranka dartii
- Saxniin dartii ama shaqaalaha fulinta qaanuunka, ama
- Ka hor Abriil 14, 2003.

Codsiyada qoran waa inaad saxeexdaa adigu ama wakiilkaaga qaanuunku. Kala xidhiidh Waaxda Xogta Caafimaadka foomka codsiyada xisaabta.

- Liiska ugu horeeya oo ah mudo 12 bilood kasta waa bilaash. Lacag baa lagu soo dalici doonaa liis kasta oo dheeraada oo aad dalbato isla 12 kaa bilood gudahooda.

**4. Xaq baad u leedahay inaad weydiisato inaad koobto Isticmaalka iyo Wadaaga Macluumaadka**

**Caafimaadkaaga.** Waxaad xaq u leedahay inaad weydiiso inaan xadidno sida aan u isticmaalno ama u wadaagno macluumaadkaaga caafimaad ee daaweynta, bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Ma xadidi kartid isticmaalka sharci ahaan la noo ogol yahay.

- Waajib naguma aha inaan kugu waafaqno codsigaaga lakiin waxaan isku dayi doonaa inaan u hogaansanaano codsigaaga.
- Xaq baan u leenahay inaan joojino heshiiska wax soo koobaya hadii aan aamino in loo baahan yahay joojintiisa ama koobida ay samaynteedu adkaato. Waa lagula socodsiiin doonaa.
- Waxaad joojin kartaa xad lagu heshiiyey adiga oo soo diraya ogeysiis qoraal ah oo joojin ah (oo aad saxiixday adigu ama wakiilkaaga sharcigu) una soo dirtid xaruntan waaxdeeda Diiwaangelinta.
- Haddii aad ka bixiso dhammaan biilasha adeeggaaga jeebkaaga, aad naga codsato in aanan u dirin macluumaad ku saabsan adeega gaarka ah ee lagu qabtay caymiskaaga, ka hor intaanad helin adeega. Waanu tixgalin doonaa codsigan ilaa iyo inta aan macluumaadka waxba looga baahnayn inuu sharaxaad ka bixiyo lacagta adeegyada kale ee uu caymiskaaga lagu leeyahay.

**5. Xaq aad u leedahay Inaad Doorato Sida aan kuugu Soo Dirayno Macluumaadka Caafimaadka.** Xaq baad u leedahay inaad weydiisato inaan kuugu soo dirno cinwaano kala duwan ama dariiqooyin kala duwan (sida telefoonka, iimaylka). Waa inaan oggolaanaa codsigaaga inta si sahlan loo samayn karo.

**V. Habka looga Cawdo sida aan u fulino dhaqanada asturnaanta.**

Haddii aad dareento in asturnaantaada lagu xad gudbay, ama aad khilaafto go'aan aan samaynay oo ku saabsan sida lagu helayo xogtaada caafimaad, waxaad u diri kartaa cabasho qoraal ah am aad wici kartaa:

- Sarkaalka u qaabilsan OhioHealth Dhaqanada Asturnaanta, Anshaxa iyo Cabashooyinka (eeg macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran).
- Waxa kale oo aad u qori kartaa cabasho Xoghayaha Maraykanka ee Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee ku taala Washington D.C. mudo 180 cisho gudahooda marka laga bilaabo markii lagu xad gudbay xuquuqdaada. Kaa aar-goosan mayno hadii aad qorto cabasho.

**Wixii macluumaad ah ee intaa ka badan kuna saabsan ogeysiiskan.** Haddii aad hayso su'aalo ama uga baahan tahay gargaar dheeraad ah ogeysiiskan, waxaad la xidhiidhi kartaa ama u qori kartaa OhioHealth Privacy Officer, in Corporate Ethics and Compliance, 180 E. Broad St., Columbus, OH 43215.

Bukaan ahaan xaq baad u leedahay inaad hesho nuqul waraaq ah oo ogeysiiskan ku saabsan dhaqanada asturnaanta, hadii xitaa aad weydiisato nuqul ah iimayl ama dariiqo kale.

**VI. Caddayn Inaad Heshay Ogeysiiskan.** Waxaa lagu waydiin doonaa inaad cadayso inaad heshay resiidka ogeysiiska fulinta dhaqanada asturnaanta ee foomka oggolaanshaha guud ee ururka.

**VII. Taariikhda Dhaqan Galka**

Ogeysiiskan fulinta dhaqanada asturnaanta wuxuu dhaqan galayaa Abriil 14, 2003.